

Calgary



# Vehicle for Hire



## OGGAYSIIIS RASMI AH OO KOOBAN #001 TAKSIGA/DIB U CUSBOONAYSIINTA SHATIGA TAARIKADA TAKSIYADA DADKA BAAHIYAHA GAARKA AH QABA

MAAJO 2026

Xilliga cusboonaysiinta 2026 ee Shatiyada Taarikada Taksiga (TPL) iyo Dib u cusboonaysiinta Shatiyada Taarikada Taksiyada Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba (ATPL) ayaa dhawaan bilaawanaya. Vehicle for Hire waxay ku faraxsan tahay inay la wadaagto warbixinno ka dhigaysa cusboonaysiinta taarikadaada mid fudud oo dabacsan.

Laga bilaabo xilliga cusboonaysiinta 2026, dadka haysta taarikada waxay dooran karaan ikhtiyaarka cusboonaysiinta aadka ugu habboon iyaga. Halkan waxaa ah waxa isbeddelaya:

Hadda waxaad ku cusboonaysiin kartaa taarikadaada taksiga qaab onlayn ah iyada oo loo marayo barteena cusub ee Gaadiidka Vehicle for Hire - looma baahna booqasho si shaqsi ah loo imaanayo!

1. **Fadlan ka xaqiiji iimaylkaaga xafiiska Vehicle for Hire ka hor intaadan gelin barteena intarneetka**
2. Booqo [vehicleforhire.calgary.ca](http://vehicleforhire.calgary.ca) ama iskaan garee koodka QR ee hoose si aad u gasho barteena intarneetka

U Cusbooneysiis si shaqsi ahaan haddii aad doorbidayso—adeeggu wuxuu kusii diyaar noqon doonaa xafiiska Vehicle for Hire.

Sanadka 2026, marka taarikada taksiga la cusbooneysiyo, taariikhda uu dhacayo waxaa la waafajin doonaa taariikhda dhalashada ee milkiilaha.

Kharashka dib u cusboonaysiinta Shatiga Taarikada Taksigu (T.P.L.) waa \$340.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan ikhtiyaarka cusboonaysiinta ee onlaynka ah, fadlan nagala soo xiriir: [Xafiiska Vehicle for Hire](#).

Fariintan waxaa loo turjumay Af-amxaari, Af-Carabi, Af-faransiis, Af-hindi, Af-bunjaabi, Af-soomaali iyo Af-urduu. Guji [halkan](#) si aad u eegto dukumentiyada.

Mahadsanid,

**Kristin Marriott**

Ku Xigeenka Madaxa, Vehicle for Hire  
Maaraynta Xaaladaha Deg-dega ah iyo Amniga Bulshadda

